Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaan ka xifdiyey toban Rakcadood

Cabdullaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaan ka xifdiyey toban Rakcadood: labo Duhurka ka horaysa, labo ka dambaysa, labo Maqribka ka dambaysa oo Gurigiisa uu ku tukan jiray, labo ka dambeeya Cishaha oo Gurigiisa ku tukan jiray, labo Subaxa ka horeeya, waxayna ahayd saacad aan loo soo galin Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, Xafsa ayaa ii sheegtay inuu ahaa marka uu Mu'adinku adimo ee fajrigu soo boxo wuxuu tukan jiray labo Rakcadood, hadalkale oo laga wariyey ayaa ahaa: wuxuu tukan jiray Jumcada ka dib labo Rakcadood.

[Xadiis Saxiix ah] [Waa laysku waafaqay Xadiiska Riwaayadiisa dhamaan]

Cabdullaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye-: wuxuu cadeeyey in sunayaasha uu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka xafiday ay yihiin toban Rakcadood oo la dhoho Sunooyinka Rawaatibta ah, laboRrakcadood oo Duhurka ka horeeya, iyo labo Rakcadood oo ka dambeeya, labo Rakcadood oo Maqribka ka dambeeya, oo Gurigiisa uu ku tukan jiray. labo Rakcadood oo Cishaha ka dambeeya, oo Gurigiisa uu ku tukan jiray. labo Rakcadood oo Fajarka ka horeeya. Sidaasay ku dhan yihiin tobankii Rakcadood. Salaada Jumcadana labo Rakcadood ayuu ka daba tukan jiray.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3062